SOMALI

Doorashada Xannaano Maalmeedka Dheer ee Tayada leh

Macluumaadka loogu talagalay Qoysaska

Waa maxay xannaano maalmeedka dheer?

Xannaano maalmeedka dheer wuxuu bixiyaa xannaano ilmo oo ku saleysan xarun carruurta dhalatay ilaa 5 sanno jir. Xarunta xannaano maalmeedka dheer waxay shaqeysaa saacado dheeraad ah si ay u siiyaan taageero qoysaska shaqeeya ama waxbarta. Carruurtu waxay iman karaan xannaano maalmeedka dheer wakhti dhan ama wakhti dhiman iyadoo ku xiran doonitaanka qoyska iyo ka helitaanka boos xannaanada.

Xarumaha xannaano maalmeedka dheer waxay siiyaan carruurta jewi ay carruurtu ku ciyaari karaan, wax ku baran karaan iyo kor u qaadida sannadahooda qaabeynta. La shirkowga qoysaska, xarumaha xannaano maalmeedka dheer waxay kobciyaan koritaanka ilmaha iyagoo adeegsanaya hegid xasaasi ah iyo fursado balaaran oo ay ku ciyaari karaan. Carruurtu waxay leeyihiin fursad ay ugu ciyaari karaan koox kooxo iyo wakhti ay iyagu keli yihiin.

Sidee baan u heli karaa xannaano maalmeedka dheer?

Maadaama ay qoysas fara badan raadinayaan xannaano carruureed tayo leh, waa muhiim inay baabaan nidaamka ay ku raadinayaan in badan ka hor inteysan u baahan xannaanada carruurta. Tan waxay u ogolaaneysaa qoysaska inay sameeyaan go'aan buuxa oo ku saabsan xarunta xannaano maalmeedka dheer ee baahidooda sida ugu fiican u fulineysa.

Golayaan badan ayaa bixiya tusaha adeegyada carruurta iyagoo taxaya adeegyada loo qabto bulshada xaafada. Qoysasku waxay sameyn karaan inay booqdaan adeegyada ka caawin doona doorashadooda xannaano oo una ogolaaneysa inay kala hadlaan nidaamyada iska diwaangelinta xarunta iyo helitaankeedaba.

Si loo caawiyo qoysaska raadinaya xannaano, Golaha Aqoonsiga Xannaanada Carruurta ee Qaranku (NCAC) wuxuu sameeyay tasiilaad magacyada adeegyada xannaanada carruurta si sahlan looga raadin karo oo ku yaal website kayaga ah (www.ncac.gov.au) ama iyagoo taleefankan ka wacaya NCAC 1300 136 554.

Maxaan raadinayaa?

Doorashadaada adeega xannaanada carruurta waxaa laga yaabaa inay saameeyaan qodobo kala duwan, qoysaska raadinaya xannaanada carruurta ee tayada leh waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka tixgeliyaan su'aalaha ugu wanaagsan ee ay weydiin karaan inay yihiin iyo waxay ka raadinayaan adeega xannaanada carruurtu inuu lahaado. Waxaa laga yaabaa sidoo kale inaad isweydiiso su'aalahan soo socda:

- Ma la Aqoonsan yahay xarunta? Weydii inaad aragto *Shahaadadeeda Aqoonsi* iyo *Qoraalka Tayada*.
- Xannaaneeyayaashu ma ula hadlaan carruurta hab diiran oo saaxiibtinimo leh?
- Maxaa nidaam wacyigelin ah oo helayaa qoyskeygu? Maxaa ku dhici doonaa ilmaheyga maalinta koowaad?
- Sidee baa layla soo socodsiinayaa isbedela shaqaalaha ? yaan kala hadlaa ilmaheyga?
- Sidee baa loo kormeerayaa carruurteyda ? sidee baa loo kormeeyayaa ilmaheyga markuu la ciyaarayo carruur ka da' weyn ama ka weynba?
- Nashaad noocee ah ayuu sameynayaa ilmaheygu?
- Maxaa natiijo celin ah oo layga siinayaa ilmaheyga maalintiisa iyo sidee baa macluumaadkan laysoo gaarsiinayaa?
- Miyuu jiraa barnaamij qoran oo muuqda? Sidee buu qoysaskeygu ugu lug yeelanayaa qoyshenta iyo qiimeynta barnaamijka?
- Sidee buu xannaaneeyuhu ugu talagalay baahida shakhsiyeed ama baahida dheeraadka ah ee ilmaheyga?
- Sidee baa loo dhegeysanayaa fikradaha iyo rayiga ilmaheyga oo wax looga qabanayaa?
- Miyey alaabta lagu ciyaaro, qalabka iyo nashaadka uu heli karaa siinayaan doorasho ilmaheyga oo ay fulinayaan xiisahiisa/heeda iyo awoodeeda/diisa.
- Miyey jiraan fursado uu ilmaheygu kaga qaybgeli karo nashaadka halkaas oo ay sahamin karaan hawlaha dhabta ah ee nolosha? Tusaale, nadaafada shakhsiyeed iyo wakhtiyada cuntada?
- Miyey jiraan boosas uu kaga qayb galo ilmaheygu cayiraaha firfircoonida leh iyo buuqa iyo sidoo kale cayaaraha degan?
- Miyuu jewiga gudaha iyo ka bannaanku iyo qalabkuba xiiso leeyihiin, nabdoon yihiin, ammaan yihiin iyo nadiif?
- Waa maxay siyaasada dabeecada lagu hayo iyo sidee bay u xaliyaan xannaaneeyayaashu haddii ay carruurtu dagaalamayaan, ooyayaan, ama aysan la shaqeyn laheyn?
- Yaa masuul ka ah siinta cuanto iyo cabitaan ilmaheyga? Cuntada la siinayaa ma ku filan tahay nafaqo se ma leedahay? Sidee baa baahida cuntada khaaska ah ee ilmaheyga loo siinayaa?
- Miyuu jiraa macluumaad qoraal ah siyaasadeed iyo mid nidaam oo loogu talagalay qoysaska? Sidee buu u isticmaali karaa qoyskeygu macluumaadkan?
- Maxaa dhacaya haddii ilmaheygu uu u baahan yahay daawo? Ka waran haddii ilmaheygu jirado ama uu shil galo inta uu ku jiro xannaanada?
- Yaa ka masuul ah keenida ilmaheyga neebkiisa? Meesha neebka lagu bedelo nadiif ma tahay? Ma la bandhigay sida neebka loo bedelo?
- Sidee baa looga caawinayaa ilmaheyga inuu ku tababarka musqusha?

© National Childcare Accreditation Council Inc - June 2005

Fadlan rog ->

- Sidee baa lay soo wargelinayaa sida uu yahay wax cunida ilmaheyga iyo sida hurdadiisu tahayba?
- Maxaa dhacaya haddii ilmaheygu uu weli heysto masaasad ama naaska la nuujiyo?
- Sidee baa loo seexiyaa ilmaheyga? Maxaa dhacaya haddii uusan ilmaheygu raban inuu seexdo?

Waa maxay habka Aqoonsiga iyo Hagaajinta tayada (QIAS)

QIAS waxay u qasdeysaa inay siiso carruurta da'da xannaano maalmeedka dheer ee Australia oo dhan xannaano tayadeedu sareyso oo kor u qaadeysa koritaanka iyo waxbarashadaba sannadahooda muhiimka ay ee hore.

Ujeedada ugu balaaran ee QIAS waxaa weeye in la hubiyo in carruurta ku jirta xannaano maalmeedka dheer inay helaan waayo aragnimo kicineysa oo dhawreysa dhammaan wejiyada koritaankooda. Sidaan ayey sameysaa iyadoo qeexeysa tayada xannaano maalmeedka dheer iyo iyadoo bixineysa si ay ku cabiraan tayada xannaanada.

Adeegyada fuliya heerarka QIAS waxaa aqoonsi siiya NCAC. Adeegyada la aqoonsado waxaa la siiyaa *Shahaadada Aqoonsiga* oo laga rabo inay ku muujiyaan meel laga arki karo. Waxay sidoo kale helaan *Shahaadada Qoraalka Tayada* oo ku tusinaysa waxyaalaha ay gaartay adeegu iyadoo loo eegayo meel kasta oo Tayo. Qoysasku waxay codsan karaan inay arkaan *Shahaadadaan.*

Heerarka Aqoonsigu waxay ku saleysan yihiin 7 Meelood ee Tayo xannaano ee hubiya in adeegyadu ay siinayaan carruurta waayo aragnimada ugu wanaagsan.

7 meelood ee Tayo ee QIAS

1. Xiriirka Shaqaaluhu ay la leeyihiin carruurta iyo Aynigooda - xiriir wada hadal xasaasi ah iyo xushmad badan oo joogta ah, isdhexgal u dhaxeeya shaqaalaha iyo carruurtu wuxuu caawiyaa inuu kor u qaado wanaaga bulsho iyo nafsadeed ee carruurta.

2. La shirkowga Qoysaska – shirkada u dhaxeysa shaqaalaha iyo qoysaska waxaa astaan u ah xiriir firfircoon iyo la tashi oo ay dhawraan shaqaalaha iyo maamulku.

3. Qiimeynta iyo Barnaamijeynta – barnaamij sameynta wax ku oolka ah waxay tixgelisaa natiijo celinta dhammaan daneynaya, oo ay ugu muhiimsan yihiin carruurtu.

4. Waayo aragnimada Carruurta iyo Waxbarashada – si ay carruurtu aduunka u dareemaan, waxay u baahan yihiin jewi kicinaya, si faker wanaagsan leh loo habeeyey, anshax ahaan ku farax gelinaya oo muujinaya dhaqmo kala duwan.

5. Ammaanka iyo Xannaanada Ilaalada leh - maamulka iyo shaqaaluhu waxay u horumariyaan ammaanka carruurta had iyo jeer, waxayna leeyihiin habab ay raacaan si ay tan u hubiyaan

6. Caafimaad, Nafaqo iyo Wanaag – xarumuhu waxay kor u qaadaan wanaaga, cunida cunto nafaqo leh iyo ku dhaqangelinta habab naadaafadeed oo wax ku ool ah gacmo mayrista iyo tallaalka.

7. Maareynta si loo Taageero Tayada – maamulku waa mid turxaan la, wax ku ool ah oo anshax leh

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Meelaha Tayada fadlan eeg QIAS *Quality Practices Guide* (2005)

Doorka qoysaska QIAS

QIAS waxay dhiirigelisaa xarun kasta oo xannaano maalmeedka dheer iyo qoysaskooda si ay u wada shaqeeyaan oo horumariyaan dibna ugu eegaan falsafada xarunta, siyaasada iyo hababka la raacayo. Tan waxay caawineysaa oo ay qaabeynaysaa waayo aragnimada carruurta iyo isdhexgalka u dhaxeeya shaqaalaha iyo carruurta.

QIAS waxay ku dhiirigelineysaa qoysaska iyo xubnaha bulshada inay lug ku yeeshaan nashaadka xarunta. Tani waxay caawineysaa carruurtu inay fahmaan bulshadooda iyo inay dhisaan xirfadooda bulsho

Waxaa sidoo kale muhiim ah in qoysasku ay si xor ah uga la hadli karaan xannaaneeyayaasha carruurtooda ama shaqaalaha adeega waxyaalaha sida siyaasada adeega ee ku saabsan edebta, nadaafada, dalxiisyada gaagaaban, tallaalka, iska ilaalinta qoraxda iyo ammaanka.

Sidii aad wax badan uga Baran lahayd Xannaanada Tayada leh

NCAC waxay aad u dooneysaa inay caawiso qoysasku inay ka bartaan wax badan oo ku saabsan xannaanada carruurta ee tayada leh. Macluumaad ku saabsan Hubinta Tayada Xannaanada Carruurta waxaa laga heli karaa website ka NCAC. Nuqulo ka mid ah daabacaada QA waxaa sidoo kale laga heli karaa adeegyada.

Qoysaska wax saluugsan ku saabsan xannaanada tayada leh ee ay bixiso adeeg xannaano saacadaha dugsiga ka baxsan waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay kala hadlaan airman adeega. Adeegyada Tayada leh waxay leeyihiin habab wax looga qabto cabashooyinka iyo xannaaqa oo bayaan ah cadna. Haddii aad soo sheegtay inaad saluugsan tahay arin ku saabsan tayada adeega xannaanada saacadaha dugsiga ka baxsan, laakiinse aan la xalin wixii aad saluugsaneyd, NCAC waxay leedahay hab ay ku xaliso waxyaalaha la saluugsan yahay, oo nuqul laga helayo website kayaga ama adoo taleefan u soo diraya NCAC.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xannaanada carruurta iyo doorashada adeeg tayo leh, fadlan kala xiriir NCAC **1300 136 554.**

Saacadaha Xafiiska: Isniin ilaa Jimce 8:30 subaxnimo – 5 galabnimo, wakhtiga NSW

Cinwaanka Boosta: Level 3, 418a Elizabeth Street Surry Hills Sydney NSW 2010

Taleefan: 1300 136 554 **Fax:** (02) 8260 1901

Iimeyl: qualitycare@ncac.gov.au

Website: www.ncac.gov.au

Adeega Turjumaada Taleefanka wixii wicitaan afafka aan Ingiriiska aheyn -131 450

Adeega Ugudbinta Qaranka ee dad soo wacaya ee hadalka iyo maqalka dhiman leh – 131 677

Xiriirada kale ee Muhiimka ah

Lacagta Xannaanada Carruurta – lacagaha qoysaska si looga caawiyo kharashaadka xannaanada carruurta. Wac Xafiiska Caawimaada Qoyska 136 150 ama Centrelink –ga xaafadaa ama Xafiiska Medicare.

Arimaha Isticmaalayasha iyo Cadaalad Ganacsiga – haddii aad wax saluugsan tahay ku saabsan lacagaha xannaanada carruurta ama heshiisyada, la xiriir wasaaradda Gobolka ama Territoriyga masuulka ka ah arimaha isticmaalayaasha iyo cadaalad u ganacsiga.

© National Childcare Accreditation Council Inc - June 2005